Casharka 41

1. Maxaa Ilaah mar waliba ula hadlaa dadka?
-Inay badbaadaan awgeed.

2. Maxaa Ilaah u doonayaa in Yoonis tago caasimadda Ninewewh?
-Waayo Ilaah wuxuu jecel yahay dadka reer Ninewewh.
-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inuu dadka reer Ninewewh ka badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.

3. Maxaa Yoonis Ilaah uga cararay?
-Yoonis wuxuu u cararay waxay ahayd isaga oo aan doonaynin inuu tago caasimadda Nineweh.

4. Waa maxay sababta aanu Yoonis u doonaynin inuu tago caasimadda Ninewewh?
-Waayo dadka reer Nineweh waxay ahaayeen dad aad u xun ama u shar badan.
-Waayo waxaa kaloo reer Nineweh ay ahaayeen cadowga Israa'iil.
-Waayo Yoonis ma uusan doonaynin in Ilaah badbaadiyo reer Nineweh.

5. Miyaa Yoonis awooday inuu ka cararo Ilaah?
-Maya.

6. Miyaa Yoonis awooday inuu Ilaah ka dhuunto?
-Maya.

7. Miyaa Yoonis awood u lahaa inuu Ilaah ka baxsado?
-Maya.
-Muxuu Ilaah sameeyey markii Yoonis addeei waayey Ilaah, oo uu ka weecday Ninaweh?
-Ilaah wuxuu soo diray Nibiri ama kalluun weyn si uu u liqo Yoonis.



9. Ilaa iyo imisa ayuu Yoonis ku jiray caloosha Nibiriga?
-Saddex maalmood iyo saddex habeen.

10. Miyaa Yoonis awooday inuu iska samatabbixiyo caloosha nibiriga?
-Maya.

11. Waa kuma kan keliya ee awooday inuu badbaadiyo Yoonis?
-Ilaah.

12. Sidee bay dadku u shaabbahayaan Yoonis?
-Isla sidii Yoonis u awoodi waayey inuu ka soo samatabbaxo caloosha nibiriga ayaa dadka oo dhamina ayan u awoodaynin inay ka samatabbaxaan awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.
-Isla sida Ilaah oo keliya uu u awooday inuu ka samata-bixiyo Yoonis, ayaa Ilaah oo keliya awood u leeyahay inuu dadka oo dhan samatabbixiyo.

13. Maxaa Ilaah sameeyey markii Yoonis oggolaaday inuu addeeci waayey oo uu ku xad-gudbay?
-Ilaah wuxuu ka yeelay in Nibirigu barriga ku soo tufo Yoonis.

14. Kaddib markii Ilaah badbaadiyey Yoonis, miyaa Ilaah u sheegay Yoonis inaanu aadin Nineweh?
-Maya.
-Ilaah isma beddelo.
-Ilaah marnaba isma beddelo.

-Ilaah wuxuu weli doonayaa in Yoonis aado Ninewewh.

15. Miyaa dadkii Ninewewh ay maqleen farriintii Ilaah ee nebi Yoonis u soo wariyey?
-Haa.

16. Maxaa loogu yeeri jiray ragga Ilaah u doorto inay wargeeyayaashiisa noqdaan?
-Nebiyo.

17. Maxaa nebiyadu u sheegeen dadka?
-Inay isaga tagaan waddada dembiga, oo raacaan waddada Ilaah.

18. Maxaa haddaba ku dhici doona tobanka qabiil ee reer binu Israa'iil haddaanay ka tegin waddada dembiga, oo aanay raacin waddada Ilaah?
-Ilaah baa wuxuu iyaga u soo dirayaa reer Ashuur si ay u daanno ugu geystaan tobonka qabiil, oo uga dhigtaan addoommadooda.

19. Maxaa haddaba ku dhacaya labada qabiil ee degganaa koofurta Israa'iil oo la oran jiray reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin, haddaanay ka tegin dariiqa dembiga oo aanay Ilaah raacin?
-Ilaah wuxuu u soo dirayaa reer Baabuloon si ay u daanneeyaan, oo welibana ay labada qabiilba ugu wataan addoonnimo.

-Inkastoo sannado badan ay ka soo wareegtay markii Ilaah ballanqaaday Badbaadiyaha, haddana miyaa Ilaah illaaway ballankiisii.

-Maya.



-Waxaa Ilaah ka ballanqaaday Aadan iyo Xaawo inuu soo diri doono Badbaadiyaha.

-Waxaa kaloo Ilaa ka ballanqaaday Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub inuu soo diri doono Badbaadiyaha.

-Ilaah wuxuu ka ballanqaaday Muuse iyo Israa'iil inuu soo diri doono Badbaadiyaha.

-Ilaah wuxuu Boqor Daa'uud iyo boqor Sulaymaan ka ballanqaaday inuu Badbaadiyaha soo diri doono.

-Ilaah ma illoobin ballankiisii ahaa inuu soo diri doono Badbaadiyaha.

-Inkatoo reer binu Israa'iil ayan Ilaah rumaysnayn, miyaa haddaba Ilaah go'aansaday inaanu soo dirin Badbaadiyaha?

-Maya.

-Inkastoo reer binu Iraa'iil ayan rumaysnayn Ilaah, maxaa Ilaah weli u doonayaa inuu soo diro Badbaadiyaha?

-Waayo Ilaah dadka oo dhan buu jecel yahay.

-Waayo Ilaah wuxuu doonayaa inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.

-Waayo Ilaahdooni maayoin qofi galo harada dabka abadanka ah, ama cadaabta.

-Yuu Ilaah u soo dhiibay farriinta ku aaddan imaanshaha

Badbaadiyaha?

-Wuxuu u soo dhiibay nebiyadiisii.

-Halkee baa lagu qoray farriinta khusaysa imaanshaha Badbaadiyaha ee ay nebiyadu wariyeen?

-Waxaa lagu qoray kitaabka Ilaah ee Baybalka.

-Ka hor intaanu Ilaah soo dirin Badbaadiyaha, Ilaah wuxuu horey u sii qorsheeyey wax waliba ee Badbaadiyaha ku dhici doona.

-Maxaa haddaba Ilaah ka sii sheegay Badbaadiyaha uu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno Ishacyaan 9:7a

7-Oo boqornimadiisa iyo nabaddu way badnaan doonaan, dhammaadna uma lahaan doonaan crshiga Daa'uud iyo boqortooyadiisa, in la sii adkeeyo, oo caddaalad iyo xaqnimo lagu sii hayo haatan iyo tan iyo weligeedba.

-Ilaah wuxu imminka leeyahay Badbaadiyaha wuxuu ka soo farcami doonaa boqor Daa'uud, oo weligiina wuxuu noqon doonaa boqor weligiis iyo weligiis.

-Maxaa kale ee Ilaah ka sheegay Badbaadiyaha uu dunida u soo dirayey?

Bal anyu akhrinno Ishacyaah 7:14

14-Haddaba sidaas daraaddeed Rabbigu maalin keliya ayuu



dadka Israa'iil ka jari doonaa madaxa iyo dabadaba, iyo laanta iyo cawsduurkaba.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha ma lahaan doono aabbe banii'aadan ah, iyo weliba hooyo aadmi ah, laakiin wuxuu ka dhalan doonaa gabar bigrad ah.

-Maxaa kale ee Ilaah ka sii sheegay Badbaadiyaha iman doonay?

Bal aynu akhrinno Miikaah 5:2

2-Laakiinse adigu Beytlaxam Efraataahay in kastoo aad ku yar tahay kumanyaalka reer Yahuudah, waxaa adiga iiga kaa soo bixi doona mid dalka Israa'iil taliye ka noqon doona, kaasoo bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis.

-Ilaah wuxuu aayadan inoogu sheegayaa in Badbaadiyuhu uu ku dhalan doonay Beytlaxam.

-Maxaa kalae ee Ilaah ka sii sheegay Badbaadiyaha uu soo diri doono?

Bal aynu akhrinno Hoosheeca 11:1

1-Markii Israa'iil ilmo yar ahaa waan jeclaan jiray, oo wiilkaygii Israa'iil waxaan uga yeedhaay dalka Masar.

-Ilaah wuxuu leeyahay, waxaan Badbaadiyaha uga yeeri doonaa dhulka Masar.

-Masaa kale oo Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 11:2

2-Oo waxaa ku dul joogi doona Ruuxa Rabbiga oo ahruuxa xigmadda iyo waxgarashada, iyo ruuxa talada iyo xoogga, iyo ruuxa aqoonta iyo kacabsashada Rabbiga.

-Waxaa Ilaah imminka leeyahay Waxaa Badbaadiyaha hoggaamin doona Ilaaha Ruuxa Qodduuska ah.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha isagu uu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 53:4-5

4-Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna qaatay murugadeennii, laakiinse waxaannu ku tirinnay mid belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan.
5-Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna, waxaana loo nabarreeyey xumaatooyinkeenna, edbintii nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina waynu ku bogsannay.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha wuxuu u silci doonaa dadka ood han.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu isagu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno Sabuuradda 41:9

9-Xataa saaxiibkaygii aan isku halleeyey, oo kibistaydii cunay, Ayaa cedhibtiisa ii qaaday.



Ilaah wuxuu leeyahay, waxaa BAdbaadiyaha gacangelin doona saaxiibkiis.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay ama ka qoray Kan uu soo diri doono?

Bal aynu akhrinno Sekaryaah 11:12-13

12-Oo waxaan iyagii ku idhi, Hadday idinla wanaagsan tahay, kiradaydii i siiya, haddii kalese iska daaya. Sidaas daraaddeed waxay kiradaydii iigu miisaameen soddon googo' oo lacag ah.
13-Oo Rabbigu wuxuu igu yidhi, Dheryasameeyaha u tuur qiimihii wanaagsanaa oo ay igu qiimeeyeen. Oo anna waxaan soo qaaday soddonkii gogo' oo lacagta ahaa, kolkaasaan guriga Rabbiga ugu tuuray dheryasameeyaha.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha waxaa lagu iibin doonaa soddon gogo' oo lacag ah.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo diri doono?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 27:2

2-Markii xumaanfalayaashu iigu yimaadeen inay hilibkayga cunaan, Kuwaasoo ah cadaawayaashayda iyo colkayga, way turunturroodeen, wayna dhexeen.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbadiyaha si baan ah ayaa loo eedayn doonaa.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay BAdbaadiyaha uu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno kitaabkii Ishacyaah 50:6

6-Kuwii i karbaashay ayaan dhabarkaygii u duway, oo kuwii timaha iga rifayna dhabannadaydaan u duway. Wejigaygiina ceeb iyo candhuuf toona kama aan qarin.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha waa la garaaci doonaa oo lagu candhuufi doonaa.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo diri doono?

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 53:7

7-Isaga waa la dulmay, waana la dhibay, laakiinse innaba afkiisii ma uu kala qaadin. isaga sidii wan la qalayo baa loo kexeeyey, oosidii lax ku aamusan kuwa dhogorta ka xiira hortooda, isagu afkiisa ma uu furin.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyuh is-daafici maayo marka la eedeeyo, oo waxaa qoran isagu afkiisa ma uu furin.

-Maxaa kale oo Ilaah ka leeyahay badbaadiyaha uu soo dirayey?

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 53:3

3-Isaga waa la quudhsaday, waana la diiday, oo wuxuu ahaa in murugeed, oo xanuun bartay, waana la quudhsaday sida mid daku wejiga ka qarsado, mana aynaan xurmayn.



-Ilaah wuxuu sii sheegayaa in Yuhuuddu ay diidi doonaa Badbaadiya.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soodiri doonay?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 69:4

4-Kuwa sababla'aanta ii nebcaadaa way ka sii badan yihiin timaha madaxayga, Kuwa doonaya inay i baabi'iyaan iyagoo cadaawayaashayda gardarro igu ah waa xoog waa xoog badan yihiin, Markaasaan magdhabay wax aanan qaadan.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha  sabab la'aan baa loo nebcaan doonaa.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu sood iri doonay?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 22:16

16-Waayo, waxaa i hareereeyey eeyo, Oo waxaa hareerahayga isku wareejiyey shirkii xumaanfalayaasha, Oo waxay iga mudeen gacmaha iyo cagaha.

-Ilaah wuxuu siis heegayaa in gacmaha iyo cagaha BAdbaadiyaha la duleelin doono.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soodirayey?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 22:18

18-Dharkayga bay qaybsadeen, oo maradaydana saami bay u ritaan.

-Waxaa Ilaah halkan inoogu sii sheegayaa in dharkiisa saami loo tuuran doono.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo dirayey?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 22:6-7

6-Laakiinse anigu waxaan ahay dixri, oo dad ma ahi,
Waxaan ahay mid la caayo, oo dadku quudhsado.
7-Oo kuwa i arka oo dhammu way igu qoslaan.
Bushimahay yuubaan, oo madaxay lulaan.

-Ilaah wuxuu leeyahay imminka Badbaadiyaha waa la caayi doonaa.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo diro doonay?

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 53:12

12-Sidaas daraddeed waxaan isaga wax ula qaybin doonaa kuwa waaweyn, isna wuxuu boolida la qaybsan doonaa kuwa xoogga badan, maxaa yeelay, isagu naftiisuu geeri u huray, waxaana lagu tiriyey kuwa xadgudbay, weliba wuxuu xambaartay kuwa badan dembigood wuuna u duceeyey kuwa xadgudbay.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha wuxuu la hdiman doonaa kuwa xad-gudbay.



-Maxaa kaloo Ilaah ka leeyahay ama inooga sheegayaa Masiixa uu soo diri doono?

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 53:9

9-Xabaashiisiina waxaa lagu daray kuwii sharka lahaa, dhimashadiisiina mid taajir ahaa, in kastoo uusan dulmi samayn, khiyaanona aanay afkiisa ku jirin.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyaha waxaa lala xabaali doonaa kuwa lacagta leh.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 16:10

10-Maxaa yeelay, naftayda She'ool kuma dayn doontid,
Kaaga qodduuska ahna uma dayn doontid inuu qudhun akro.

-Ilaah wuxuu leeyahay Badbaadiyuhu wuxuu ka soo sara-kici doonaa dhimashada.

-Maxaa kale ee Ilaah ka leeyahay Badbaadiyaha uu soo diri doonay?

Bal aynu akhrinno Sabuurka 68:18a

18-Adigu kor baad u baxday, oow aaad qabatay oo kaxaysay kuwii maxaabiista ahaan jiray.

-Ilaah wuxuu leeyahay Bdbadiyaha wuxuu dib ugu noqon doonaa

Samada.

-Ka hor intaanu Ilaah Badbaadiyaha soo dirin, Ilaah wuxuu sii qorsheeyey wax waliba ee ku dhici doona Badbaadiyaha.

-Nebiyada Ilaah waxay reer binu Israa'iil u sheegayeen wax ku saabsan Badbaadiyaha Ilaah soodiri doonay.

-Nebiyada Ilaah waxay kaloo u sheegeen reer binu Israa'iil inay isaga tagaan dariiqa dembiga oo ay raacaan dariiqa Ilaah.

-Miyaa badanaa reer binu Israa'iil ay maqleen wixii nebiyada Ilaah u sheegayeen?

-Maya.

-Maxay reer binuIsraa'iil ku sameeyeen nebiyadii Ilaah?

-Way wada laayeen.

-Maxaa reer binu Israa'iil u laayeen nebiyada Ilaah?

-Waayo nebiyada Ilaah waxay iyaga u sheegayeen inay isaga tagaan dariiqa dembiga iyo inay raacaan dariiqa Ilaah.

-Waayo nebiyada Ilaah waxay reer binu Israa'iil u sheegayeen in Ilaah ku ciqaabayo dembiyadooda dhimasho?

-Maaddaama reer binu Israa'iil ay jeclaayeen dembiyadooda, ayaanay doonaynin inay Ilaah addeecaan.

-Intii ay maqli lahaayeennebiyada Ilaah, yey door-bideen inay



maqlaan?

-Nebiyada beenta ah.

-Nebiyada beent aah waxay lahaayeen, waxaannu nahay nebiyo Ilaah, laakiin bil-xaqiiqa waxay ahaayeen nebiyada Shayddaanka.

-Nebiyada beenta ah waxay dadka u sheegi jireen in Ilaah aanu ku ciqaabaynin dembiyadooda.

-Nebiyada beenta ah waxay oran jireen oo kale waxaannu sheegaynaa ama baafinaynaa runta Ilaah, laakiin maxay dadka u sheegi jireen?

-Beenta Shayddaanka.

-Yaa ka dhex hadlayey nebiyada beenta ah?

-Shayddaanka.

-Maanta, miyaa Shayddaanku weli sii wadaa inuu beentiisa dadka qaarkii soo dhex marsiiyo?

-Haa.

-Shayddaanka wuxuu leeyahay isagoo soo maraya dadka qaar, waa inaad raacdaan kuwii hore ee aad ka soo farcaneen.

-Shayddaanka wuxuu dadka barayaa inaanay dhegaysanin Hadallada Ilaah.

-Isagoo soo dhex maraya dadka qaarkii, ayaa Shayddaanku

leeyahay Hadallada Ilaah run maahan.

-Shayddaanka wuxuu dadka u sheegayaa inaanu Ilaah dembiga ciqaabaynin.

-Inkastoo reer binu Israa'iil ay caabudayeen asnaam ay samaystaan, miyey haddana caabudayeen Ilaah.

-Haa.

-Miyaa Ilaah aqbalay caabudista reer binu Israa'iil ay sanamyadooda caabudayaan, oohaddana ay isaga ku caabudayaan Macbudka?

-Maya.

-Waa maxay sababta?

-Waayo Ilaah wuxuu garanayaa inay isaga ku caabudayeen bushimahooda.

-Waayo Ilaah wuxuu kalgoo garanayey inay caabudista sanamka iyaga ka ahayd kal iyo laab.

-Haddaba waa kuma kan garanaya qalibyadeenna?

-Ilaah.

-Ilaah wuxuu arki karaa wax waliba ee qalbiyadeenna ku jira.

-Ilaah wuxuu garanayaa inaynu isaga ku caabudayno bushimaheenna ama inaynu ku caabudayno qalbiyadeenna.



-Maxaa Ilaah ka leeyahay qalbiyadeenna?

-Ilaah wuxuu leeyahay waxaa qalbiyadeenna oodhan ka buuxa dembi.

-Inkastoo kuwo badan oo innaga ah ay caabudayaan asnaam, miyey haddaba jireen reer binu Israa'iil caabudayey Ilaah?

-Haa.

-Laakiin way yaraayeen.

-Yey haddaba kuwa reer binu Israa'iilka ah oo Ilaah caabudayey ay sugayeen?

-Waxay sugayeen ama dhowrayeen in Ilaah u soo diro iyaga Badbaadiye.